Somali

Sidee Falka Labaad u caawimaa dumarka Dhaqan ahaan iyo Af ahaan Kala Jaadjaadka ah (CALD)

Waa maxay Qorshaha Qaranku?

Qorshaha Qaranka ee lagu yareynayo rabshada ka-soo-horjeeda dumarka iyo carruurtooda ee 2010-2022, oo loogu yeero Qorshaha Qaranka, waa qorshe muddo dheer ah waxaana ogolaaday dhamaan xukuumadaha reer Australia. Hiigsiga Qorshaha Qaranku waa:

Dumarka reer Australia iyo carruurtoodu waxay xor ka yihiin rabshad bulshada dhexdeeda.

Waan ogsoonahay in dumar kale duwani ay soo martay aragtida rabshada. Qaarkood ayaa aad ugu nugul qaarkoodna waxaa laga yaabaa inay ka yimaadeen qawmiyadaha kala jaadjaadka ah ee luqadaha iyo dhaqanka ku kala duwan (CALD). Dumarka halkaan ku yimid soogalooti, qaxooti iyo ardada dibadaha ka yimid ayaa waxaa waajihi kara loolan gaar ah. Loolankaan waxaa ka mid noqon kara lacag la'aan, in aanay awoodin inay hellaan kaalmada ay u baahan yihiin haddii rabshada ku dhacaan waxayna dareemaan in aanay ka baxsan karin rabshada. Tan waxaa laga yaabaa inay sii adkaysay luqada, dhaqanka iyo sharciga oo cusub.

Waa maxay Qorshaha Falka Labaad?

Qorshaha Falka Labaad waa kii labaad oo heerarkii afraad ah ee Qorshaha Qaranka. Wuxuuna soconayaa 2013 ilaa 2016ka wuxuuna ka kooban yahay 26 fal oo hawleed kuwaas oo dhamaan dawladuhu isku raaceen inay muhiim u yihiin wanaajinta amaanka dumarka.

Intii lagu jiro Qorshihii ugu horreeya, waxaa la isla meel dhigay asaas muhiim ah si loo joojiyo, waxna looga qabto loona barto waxyaalla badan oo ku saabsan rabshada lidka ku ah dumarka. Laakiin waxaa weli jira waxyaalla badan oo ay tahay in wax laga qabto.

Aad ayaan u doonaynaa in aan fahamno sida ugu fiican oo aan uga hortegi karno rabshada lidka ku ah dumarka asalkoodu yahay CALD iyo kaalmaynta Dumarka CALD ee rabshadu waxyeeshay.

Qorshaha Falka Labaad wuxuu leeyahay diirad xoogan o ku wajahan dumarka iyo bulshooyinka leh khibradaha kala duwan ee rabshada, kuwaas oo ay jiraan dumarka CALD, iyo sidaan ku wanaajin karno kaalmada ay ka helli karaan dhamaan adeegyada iyo nidaamka.

Waxaan u baahanahay in aan sahamino kala duwnaanshaha dumarka CALD iyo inay bartaan waxyaalla badan oo ku saabsan rabshada ka soo horjeeda dumarka ka kala socda bulshada CALD.

Haddii aad naga caawinto waxaan baran karnaa wixii u shaqeeya bulshadaada si loo xafido dumarka iyo gabdhaha aad taqaan. Hoos u dhigida rabshada wax lagu yeellayo dumarka iyo carruurtooda waa arrin bulsho – waxayna dhamaanteen nooga baahan tahay da'daal.

Maxaa lagu samaynayaa Qorshaha Falka Labaad si loo caawimo dumarka CALD?

Saddexda sano oo soo socta waxaanu caawimi doonaa dumarka CALD iyo carruurtooda iyada oo:

- **La siinayo kharaj bixin siyaada ah White Ribbon si loo siyaadiyo ka warhaynta** bulshada CALD iyo kuwa asaliga ah.
- **Abuurista qalabka horumarinta si loogu sheego loona kaalmeeyo dumarka arrimaha fiisada ninkooda dibada jira** kuwaas waxaa ku jira macluumaad muhiima oo ku saabsan adeegya muhiima iyo meelaha degdegta ah ee lagala xirirayo Australia.
- **Raadinta helida macluumaad siyaada ah** oo uu u bixiyo ninka gabadha qaba ee Australia jooga ama ninkay rabaan inay isguursadaan oo dalbanaya qofka guurka ku imanaya.
- **Kharaj ku bixinta Our WATCh** si loo xoojiyo diirad saarida dumarka CALD iyo bulshooyinka loona bixiyo mashruuca ka hortagga asaasiga ah ee gaarka u ah CALD.
- **Sii wadida la shaqaynta *The Line* si loo abuuro macluumaad khaas ah ee** dadka dhalinta yar iyo bulshooyinka.
- **Kharaj ku bixinta Australia's National Research Organisation for Women's Safety** si loo ogaado 'waxa caawima' in la joojiyo rabshada loo geysto dumarka CALD iyo carruurtooda.
- **Wax ka qabashada dhaqanka xun ee saamaynaya dumarka iyo carruurtooda**, sida gudniinka khasabka ah, iyo ka ganacsiga dumarka.
- **Horumarinta istaraatiijiya wada xiriir oo lagu wanaajinayo helista macluumaadka dumarka ka tirsan CALD iyo bulshooyinka** loona tuso **fursadaha ay helli karaan xagga ka qaybgalka iyo hogaaminta**.

Maxaan ilaa hadda samaynay si aan u caawino dumarka CALD?

Wadajir ahaan, saddexdii sano oo la soo dhaafay, waxaanu haysanaa:

- **Deeqaha fal bulsho oo la maalgeliyey** si loo caawimo bulshooyinka CALD loona sameeyo xarakaadyo ka hortag asaasi ah oo kala duwan, sida hawlwadeenada ka hortagga rabshada iyo kulama wada-tashi, wada sheekaysi bulsho iyo kulama cilaaqaad caafimaadka qaba.
- **Macluumaadka loo daahfuray bulshooyinka kala duwan ee kooxaha luqadaha ee hoos imanaya *The Line***, oo ah olole caawimaya dadka dhalinta yar inay samaystaan cilaaqaad caafimaad qaba halkaas oo raga iyo dumarku siman yihiin.
- **Waxaa kharaj loogu Adeega talasiinta telefoonka qaranka** oo loogu talagalay in dadku ku hellaan kaalmo markay haysato, ama khatar ugu jiraan rabshada guriga ama qoyska iyo/ama faraxumayn. **1800 RESPECT (1800 737 732)** waa lacag la'aan, waxaana la hellaa 24ka saacadood, 7da berri ee asbuuca dhamaana macluumaadku waa qarsoodi.
- **Waxaa la siiyaa tababar iyo kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha caafimaadka** si loo caawimo inay aqoonsadaan dumarka iyo carruurta ay haysato rabshada qoyska.

Caawima ma u baahan tahay?

Haddii adiga ama qof aad taqaano ay haysato rabshada qoyska ama faraxumayn raadso caawimo adiga oo wacaaya:

- **000** haddii, ilmo, ama qof kale uu ku jiro khatar degdeg ah
- 1800 RESPECT – **1800 737 732**
- Relationships Australia – **1300 364 277**
- Mensline (khadka ragga) – **1300 789 978**

Ma rabtaa inaad intaas ka badan ogaato?

Qorshaha Qaranka iyo Qorshaha Falka Labaad waxa laga helli karaa online goobta **www.dss.gov.au/nationalplan**